



## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Maajo 2024 ayaa gaaray 150.64, marka la barbardhigo 148.42 bishii Abriil 2023.

Isbedel bileedka, Maajo 2024, marka la barbar dhigo Abriil 2024, ayaa hoos u dhacay 1.49 boqolkiiba.

Sare u kaca ugu badan ee billaha ahi ayaa ahaa qiimaha **Cuntada & Cabitaanada** 3.83. Sare u kaca **Cuntada & Cabitaanada** ugu badan ayaa inta badan ka yimid qiima kororka **Cuntada** 3.68 boqolkiiba.

Qiimaha kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **Hilibka** 7.29 boqolkiiba.

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Maajo 2023 iyo Maajo 2024 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa hoos u dhacay 4.80 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.21 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Abriil 2023 iyo Abriil 2024.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Maajo 2024 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Maajo 2024	
Tusaha bishan (Maajo 2024)	150.64
Tusaha bishii hore (Abriil 2023)	148.42
Tusaha sanadkii hore (Maajo 2023)	143.73
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	1.49%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	4.80%

#### Heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqleyda ee 12 bilood

#### Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maajo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Maajo 2024

### Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Maajo 2024

Heerka sicir-bararka bisha Maajo 2024 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maajo 2023 iyo Maajo 2024.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa hoos u dhacay 4.80 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maajo 2023 iyo Maajo 2024, marka labar bardhigo 5.21 boqolkiiba 12kii bilood, Maajo 2023 iyo Maajo 2024.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Maajo 2024 ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 1.49 boqolkiiba.

### Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Maajo 2024.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 3.83 boqolkiiba, bishii Maajo 2024 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 2.55 boqolkiiba bishii Abriil 2024. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sare u kacay 0.02 boqolkiiba bishii Maajo 2024. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray -3.97 boqolkiiba Abriil 2024.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa hoos u dhac bille ah sameeyey 1.55 boqolkiiba ee Maajo 2024. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 4.10 boqolkiiba Maajo 2024. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo sare u kacay 10.58 boqolkiiba ee Abriil 2024.

### Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maajo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Maajo 2024(Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Isgaarsiinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 42.46 boqolkiiba bishii Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+61.05 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 29.78 boqolkiiba Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (+38.88 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Dharka caruurta (+78.86 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 19.18 boqolkiiba Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+22.30 boqolkiiba).
- **Tacliinta** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.18 boqolkiiba Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay qiimaha lagu dhigto Dugsiga sare oo u gaaray (+28.26 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 7.10 boqolkiiba bishii Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Hoteelada (+11.03 boqolkiiba).
- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 6.71 boqolkiib bishii Maajo 2024. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid tubaakada gaar ahaan sigaarka (+12.56 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diiwaan galiyey sare u kac sanadle ah oo dhan 6.20 boqolkiiba Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dhalada, Maacuunta & Agabka miisaska (+17.89 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 4.10 boqolkiiba bishii Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Biyo gelinta (+6.31 boqolkiiba).


- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac sanadle ah 3.59 boqolkiiba, bishii Maajo 2024. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+11.13 boqolkolkiiba).

### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bishii Maajo 2024(-)

- Ma jirin hoos u dhac Sanadle ah muuqda ee Maajo.

### B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB –da

**Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Maajo 2024 (Dec 2014 = 100)**



### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Maajo 2024(+)

- **Cuntada & Cabitaanada** ayaa sameeyey sare u kac bille 3.38 boqolkiiba bishii Maajo 2024. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid cuntada 3.68 boqolkiiba. Sababta, qiima kor kudhacay qiimaha Hilibka 7.29 boqolkiiba.

### Qeybaha ugu waaweyn oo sicirkoodu hoos u dhacay

- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan galiyey hoos u dhac bille ah oo dhan -9.07 boqolkiiba Maajo 2024. Hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dharka (-32.92 boqolkiiba), hoos u dhaca waxaa sababay Dharka Dumarka -35.71 boqolkiiba.

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Maajo 2024ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Maajo 2023 TSB	Abriil 2024 TSB	Maajo 2024 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan Qeybaha Tsb</b>	<b>100.00</b>	<b>143.73</b>	<b>148.42</b>	<b>150.64</b>	<b>1.49</b>	<b>4.80</b>
Cuntada & Cabitaanada	46.04	151.85	146.28	151.88	3.83	0.02
Tubaakadda	1.25	162.88	173.80	173.80	0.00	6.71
Dharka & Kabaha	5.03	154.14	219.99	200.04	-9.07	29.78
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	138.74	142.22	144.43	1.55	4.10
Agabka Guryaha	2.93	116.56	123.74	123.79	0.04	6.20
Caafimaadka	5.00	176.45	182.78	182.78	0.00	3.59
Gaadiidka	3.77	120.96	120.31	122.64	1.93	1.39
Isgaarsiinta	2.80	117.07	166.78	166.78	0.00	42.46
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	104.30	104.30	0.00	0.43
Tacsiinta	4.00	109.11	116.95	116.95	0.00	7.18
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	145.78	156.13	156.13	0.00	7.10
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	114.03	134.74	135.90	0.86	19.18

### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan goysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


### Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Juun, 2024 waxaa la baahin doonaa 15 Juulay, 2024. Wixii faahfaahintaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogenea rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Maajo 2024 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha Xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Maajo 2024** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia